

EndoFLIP

EndoFLIP

About this procedure

EndoFLIP is a test done to measure the area in your gastrointestinal organs, such as your esophagus and stomach, and the pressure inside that organ. It can be used to:

- Find the cause of problems swallowing, coughing, or choking when swallowing.
- Help identify the cause of pain during swallowing.
- Find the cause of vomiting, feeling of a lot of fullness after eating, stomach pain, or bloating. For this test, a balloon is used to measure how well the valve in the stomach, called the pyloric sphincter, stretches.
- Open an area without the need for X-rays, called therapeutic dilation. This uses a slightly different kind of balloon to stretch the area and is called EsoFLIP.

How the test is done

- During an upper endoscopy, while you are sedated, your doctor will place a long tube, called a catheter, through your mouth into your esophagus. This tube has a small balloon on the end.
- Fluid is put in through the tube to inflate the balloon. Special sensors in the balloon take measurements.
- This test can add about 45 minutes to the time it takes to do an endoscopy.

Ku saabsan habraaca

EndoFLIP waa baaritaan la sameeyo si loo cabbiro aagga ku yaala xubnaha calooshaada, sida hunguriga iyo caloosha, iyo caddaadiska kd jira xubintaas. Waxaa loo isticmaali karaa:

- Ogaanshaha sababaha dhibaatooyinka liqidda, qufaca, ama xiiqda marka aad wax liqayso.
- Gacan ka geysashada inaad ogaato sababta xannuunka xilliga wax liqida.
- Ogaanshaha sababta matagga, dareemida dheregta badan kadib cuntada, calool xannuunka, ama bararka. Baaritaankan, buufin ayaa loo isticmaalaa si loo cabbiro sida wanaagsan ee waalka caloosha, ee loo yaqaano sphincter pyloric, uu u fidsamo.
- Furitaanka aag jireed iyadoo la adeegsanaynin Raajooyin, waxaana loo yaqaan fidinta daaweynta ah. Tani ayaa waxaa loo adeegsadaa buufin nooc kale ah si ay u fidsiso aagga waxaana loo yaqaanaa EsoFLIP.

Sida baaritaanka loo sameeyo


- Inta lagu gudajiro gelinta jirka kaamarada lagu eego, marka lagu suuxinayo, dhakhtarkaagu wuxuu dhigi doonaa tuubo dheer, oo loo yaqaan kateetar, afkaaga ayuu gelin doonaa hungurigaaga. Tuubbadani waxay buufin yar ku wadataa dhammaadka.
- Dheecaan ayaa la ariyaa tuubbo si loo buufiyo buufinta. Dareemayaasha gaarka ah ee ku jira buufinta ayaa qaada cabbirada.
- Baaritaankani ayaa wuxuu ku dari karaa ilaa 45 daqiiqo waqtiga la sameynayo gelinta jirka kaamarada lagu eego.




THE OHIO STATE UNIVERSITY

WEXNER MEDICAL CENTER

Qalabka Cabbira Hunguriga ee EndoFLIP Esophageal EndoFLIP



Qalabka Cabbira Laba iyo Tobbanlaha ee EndoFLIP Pyloric EndoFLIP



Risks of the test

When EndoFLIP is used to check for problems, there is a very small risk of bleeding or putting a hole in the wall of your esophagus or stomach, called perforation. To prevent this, the pressure from the balloon is limited and closely watched with a computer.

Khataraha baaritaankaaga

Marka EndoFLIP la isticmaalo si loo baaro dhibaatooyinka, waxaa jirta khatar aad u yar oo dhiigbax ah ama dalool ku dhasha gidaarka hunguriga ama calooshaada, oo loo yaqaano turuq. Si taasi looga hortago, caddaadiska buufinta waa la xaddidaa oo si dhow ayaa looga eegaa kombiyuutarka.

There are no known reports of serious problems from EndoFLIP being used as a test to diagnose a problem. When EndoFLIP is used for treatment reasons, there is also a small risk of bleeding or perforation.

Preparing for your test

- **Starting in the morning, you can have only liquids the day before your test (liquid diet).**
- **Do not eat or drink anything after 11 p.m. the night before your test.**
- You need to have an adult come with you and drive you home because of the medicines you will get to help you relax during the test. If you take a cab, bus, or medical transportation service, an adult other than the driver needs to come with you.
- You should not smoke or vape the day before and on the day of your test.

Ma jiraan warbixino la og yahay oo sheegaya dhibaatooyin halis ah oo ka dhasha EndoFLIP marka loo isticmaalo baaris si loo ogaado dhibaataada. Marka EndoFLIP loo isticmaalo ujeedo daawayn, waxaa sidoo kale jirta khatar yar oo ah dhiigbax ama turuq.

U diyaarinta baaritaanka

- **Laga bilaabo subaxda, waxaad cabbi kartaa oo keliya maalin ka hor baaritaankaaga (cuntada dareeraha ah).**
- **Waxna ha cunin hana cabbin 11-ka duhurnimo kadib habeenka ka horreeya imtixaankaaga.**
- Waa in qof weyn uu ku raaco oo guriga ku geeyo iyadoo ugu wacan daawooyinka aad qaadan doonto si uu kaaga caawiyo inaad nafisto inta lagu gudajiro baaritaanka. Haddi aad raacdid taksi, bas, ama adeega gaadiidka caafimaadka guriga, qof weyn aan aheyn darawalka ayaa loo baahanyahay inuu ku soo raaco.
- Waa inaad cabbin sigaar ama shiishada dhijitaalka ah (vape) maalinta ka horeysa iyo maalinta laguugu sameynayo baaritaankaaga

Medicine Changes Before Your Procedure

You may need to make changes to your medicines many days before your procedure. Read carefully the medicine change information at go.osu.edu/pted5355 or review the copy with these instructions. These include blood thinners, medicines for diabetes, weight loss, heart conditions, and others. **If you do not review and make the needed medicine changes, your procedure may need to be rescheduled.**

Isbadalada Daawada Kahor Baaritaankaaga

Waxaad u baahnaan doontaa inaad isbadalo ku samaysid daawooyinkaada dhowr maalmood ka hor baaritaankaaga. Si taxadar leh u akhri macluumaadka ku saabsan bedelka daawada ee ku yaala bogga go.osu.edu/pted5422 ama dib u eeg nuqulka leh tilmaamahan. Daawooyinkan waxaa ka mid ah dawooyinka dhiiga khafiifiya, dawooyinka sokorta, kuwa miisaanka lagu yareeyo, kuwa xanuunada wadnaha lagu daweeyo, iyo kuwa kale. **Haddii aadan dib u eegin oo aad sameynin isbedellada daawada ee loo baahanyahay, baaritaankaaga wuxuu u baahnaan donaa in dib loo dhigo.**

- **If you have an implanted stimulator device**, it should be turned off before your procedure. Please bring the remote with you on the day of the procedure.
- If there are major changes to your health, please contact the healthcare provider who is doing your procedure. Your procedure may need to be changed for your safety.
- If you have alcohol, marijuana, or illegal drugs in your system, your procedure may be rescheduled for your safety.
- **Haddii uu jiro qalab loogu talagalay inuu wax fududeeyo oo lagu beeray jirkaaga**, waa in la damiyaa ka hor inta la samaynin baaritaankaaga. Fadlan la imow daara-demiyaha (rimuudka) maalinta baaritaankaaga.
- Haddii ay jiraan isbadalo waaweyn oo ku yimaadda caafimaadkaaga, fadlan la xiriir bixiyaha daryeelka caafimaadka kaas oo samaynaya baaritaankaaga. Baaritaankaaga ayaa la baajin karaa si loo ilaaliyo badqabkaaga.
- **Haddii jirkaada uu ku jiro khamri, marijuana mise maandooriyaasha sharci dara ah**, baaritaankaaga dib ayaa loo dhigi donaa si loo ilaaliyo badqabkaaga.

What to expect after

- You will be taken to a recovery room where your driver can join you.
- You may feel some soreness in your throat after the test. This is normal. Your doctor may prescribe a medicine called Magic Mouthwash for this. This is a liquid containing a numbing medicine (lidocaine), a sedative (Benadryl) and an antacid (Maalox).
- Your doctor will explain your results and you will get instructions for your diet, medicines, and follow-up.
- Your test results will also be shared with your doctor who referred you for this test.

Waxa la filan karo baaritaanka kadib

- Waxaa lagu geyn doonaa qolka soo kabashada halkaasoo darawalkaagu kuugu iman karo.
- Waxaa laga yaabaa inaad ka dareento waxxoogaa xannuun ah cunahaaga baaritaanka kadib. Tani waa caadi. Waxaa laga yaabaa in dhakhtarkaagu kuu qoro daawo loo yaqaano Magic Mouthwash. Tani waa dareere ka kooban daawo kabuubiso ah (lidocaine), daawo suuxdin ah (Benadryl) iyo daawo kahortagto aasiidhka (Maalox).
- Dhakhtarkaaga ayaa kuu sharxi doona natiijadaada waxaadna heli doontaa tilmaamaha loogu talagalay cuntada, daawooyinka, iyo dabagalka.
- Natiijooyinka baaritaankaaga sidoo kale waxaa lala wadaagi doonaa dhakhtarkaaga kaasoo kuu soo gudbiyay baaritaankan.

When to get help

Call 911 any time you think you may need emergency care. Call if:

- You passed out (lost consciousness).
- You have trouble breathing.
- You pass maroon colored or bloody stools.

Call your doctor now or seek medical care right away if:

- You have pain that does not get better after you take pain medicine.
- You have new or worse belly pain.
- You have blood in your stools.
- You are sick to your stomach and cannot keep fluids down.
- You have a fever.
- You cannot pass stools or gas.

Watch closely for changes in your health, and be sure to contact your doctor if:

- Your throat still hurts after a day or two.
- You do not get better as expected.

Xilliga caawimaad la raadsado

Wac 911 waqti kasta oo aad u malaynayso inaad u baahan karto daryeel degdeg ah.

Wac haddii:

- Miyirku kaa tago (miyir-beesho).
- Neeftu kugu adkaato.
- Ay kaa imaato saxaro midab maruun leh ama dhiig leh.

Wac dhakhtarkaaga hadda ama raadso daryeel caafimaad isla markiiba haddii:

- Aad qabto xannuun aadan ka raysan kadib markaad qaadatao xannuun-baabi'iyee.
- Aad qabto calool xannuun cusub ama ka sii dara.
- Aad saxaro dhiig leh kaa timaado.
- Aad ka bukoonayso calooshaada oo aadan qaadan karin dareeraha.
- Aad qabto xummad.
- Ay kaa iman waayaan saxaro ama dhuuso.

Si dhow ula soco isbeddelada ku yimaadda caafimaadkaaga, oo xaqiiji inaad la xiriirto dhakhtarkaaga haddii:

- Cunaha weli ku xanuunayo maalin ama laba maalmood kadib habraaca.
- Aadan u bogsanin sidii aad filaysay.

Buug-gacmeedkan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macaluumaad oo kaliya. La hadal dhakhtarkaaga ama kooxda daryeelka caafimaadka haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan daryeelkaaga.

This handout is for informational purposes only. Talk to your doctor or health care team if you have any questions about your care.